Place2Be, 175 St John St, Clerkenwell, London EC1V 4LW
Tel: 020 7923 5500 Email: enquiries@place2be.org.uk

Warqada macluumaadka ee loogu tallo galay waalidka / daryeelaha

Place2Talk Su'aalaha badanaa ay is waydiiyaan waalidka iyo daryeelahu

1. Waa maxay Place2Talk?

Mid ka mid ah qaybaha ugu caansan ee adeeggan taageerada dugsiga waxa loo yaqaan 'Place2Talk'. Waxay u furan tahay dhammaan ardayda, waxaanay qabsan karaan balan si ay 15 daqiiqo ula joogaan la lataliye tabobar leh, iyaga oo kaligood ah ama uu saaxiib la socdo. Isku celcelis ahaan, qiyaastii saddex meeloodo meel ardayda dhigata dugsiyada Place2Be ayaa sanad kasta ka faa'iideysta adeeggan. Ardaydu inta badan waxay ka hadlaan saaxiibtinimo ama wixii walwal kasta ee ay qabaan.

2. Waxaanu sameynaa xiisada Place2Talk?

Place2Be Maareeyaha Barnaamijka Dugsiga (SPM).

Place2Be waa xubin ka tirsan ururka Ururka Ingiriiska ee La-talinta iyo Cilmi-nafsiga (British Association of Counselling and Psychotherapy ama BACP). Tani macnaheedu waa in shaqadayada SPMs ay waafaqsan yihiin Nidaamka anshaxa iyo Habdhaqanka Anshaxa, si ay u hubiyaan in macluumaadka ilmahaagu uu sir yahay.

3. Ayay SPMs kala hadashaa xiisadaha Place2Talk?

Place2Be waxa sidoo kale saaran masuuliyada ah in ay caruurta ilaaliyaan oo ay raacaan habka ilaalinta sida iyo marka loo baahdo, laakiin haddi kale marna uma shaacin doono macluumaadka ilmahaaga cid kale.

4. Waa maxay qiimeynta Place2Be maxayse muhiim ugu tahay?

Place2Be waxay ururiyaan macluumaad si loo qiimeeyo hufnaanta shaqadayada oo aan wax ka barano sidii loo siinaayo adeegga ugu fiican ee carruurta iyo qoysas Si ay Place2Be si sax ah ugu shaqo, waxaan u baahannahay inaan ogaano sida gargaarka aanu bixino uu ugu caafimaadka dareenka carruurta iyo waxbarashadooda iyo horumarkooda waxbarasho. Tani waxay naga caawineysaa inaan sugno maalgelin dheeraad ah, iyadoo sidaas darteedna aanu caawinno carruurta badan, iyagoo ay awoodi karno inaan muujino in adeegyadayadu ay yihiin qaar wax ku ool ah. Waxaan ururinaa macluumaad shakhsiga ee ugu yar ee macquulka ah, iyadoo aanu u keydino si ammaan ah, si markaa arimaha gaarka ah ee carruurtu aanay si xun u saameyn.

5. Waa maxay macluumaadka ilmahaaga ku saabsan ee ku jira qiimeynta Place2Be?

Place2Be waxay ururiysaa macluumaadkan soo socda ee ay ka yimid dugsiga: maga ilmaha, taariikhda dhalashada, sanad dugsiyeedka, jinsiga iyo qowmiyadda. Ka dibna waxaan ku qornaa

faahfaahin kooban oo ku saabsan balamaha carruurta iyo arrimaha laga xaajoodey, iyo sidoo kale ficil kasta oo loo soo jeediyey sida qeybta ka ah natiijada xiisada.

6. Macluumaadka ilmahaaga ma mid qarsoodi ah baa?

Haa. Magaca cilmahaagu kuma jiri doono xogta cilmi baaristayada. Macluumaadka ilmahaaga ayaa loo keydin doonaa si sugan/ammaan ah.

7. Waa maxay Xeerka Ilaalinta Macluumaadka iyo Xeer laalinta Macluumaadka ee Guud (General Data Protection Regulation ama GDPA)?

Waxay DPA 2018 da cusub dadka siinayaa awooda ay ku kantaroolayaan macluumaadka shakhsi ahaaneed (xogta) waxayna ka dalbanaysaa ururada heysta macluumaadka shakhsi ahaaneed si ay ugu dhaqmaan hab sharci ah oo hufan. Waxay GDPR u keentay sharciga UK, si kor loogu qaado xakamaynta dadka ee xogtooda shakhsi ahaaneed. Place2Be waxay ku shaqeysaa DPA 2018 iyo GDPR si loo hubiyo in macluumaadka shakhsiga, tusaale ahaan, magaca, taariikhda dhalashada, si sharci ah loo ururiyo, lagu keydiyo meel amaan ah oo aan loo gudbin dadka kale ama hay'adaha kale.

8. Sidee ayaanu u ilaalinaa macluumaadka ilmahaaga?

Waxaanu daneynaynaa ilaalinta macluumaadka ilmahaaga. Xeerarkayaga iyo nidaamyadeena ayaa hubinaaya in macluumaadka aanu heli karin qof aanay aheyn inuu arko. Waxay sidoo kaloo ka ilaaliyaan inay lunto ama si xun loo isticmaalo macluumaadka. Waxaa naga go'an inaan qaadno tallaabooyin kasta oo ku habboon ee lagu ilaalinaayo macluumaadka shakhsiga ee aanu hayno. Tani waxaanu sameynaa annagoo leh tallaabooyin kala duwan, oo ay ku jiraan macluumaadka lagu hayo xog sugan oo ammaan ah, oo lagu ilaaliyo xaraf sir ah oo kaliya ay heli karaan kuwa u baahan inay arkaan macluumaadka si ay adeegga ilmahaaga ugu siiyaan.

9. Maxaanu u codsan weyney ogolaansho si aanu ugu ururino macluumaadka ku saabsan ilmahaaga?

Waxay ujeedadayadu tahay inaan lahaano adeeg uu ilme kasta oo dugsiga jooga uu heli karo marka ay u baahdaan. Place2Talk waa adeeg qiimo badan oo gargaar ah halkaas uu qofku isku soo gudbiyo kalidiis oo hoos u dhiga dhaleeceynta iyadoo la heli karo. Ilme kasta oo waalidkii/daryeelihiisu uu u ogolaaday in ilmahoodu uu isticmaali karro Place2Talk ayaa imaan kara.. Xaaladaha noocaas ah, oggolaanshaha waalidka looma baahna in la diiwaangeliyo ama la kaydiyo ama lagu qiimeeyo macluumaadka ilmaha, maxaa yeelay

ROYAL PATRON
HRH The Duchess Of Cambridge

www.place2be.org.uk
Registered Office: Place2Be, 175 St John St, Clerkenwell, London EC1V 4LW Tel: 020 7923 5500
Registered Charity in England and Wales (1040756) and in Scotland (SC038649)
Registered Company in England and Wales (02876150)

Registered with FUNDRAISING REGULATOR

sharciyada kale ee qaanuunku ayaa bilaabmaaya inay shaqeeyaan si loo hubiyo in macluumaadka ugu yar la soo ururiyo oo loona isticmaalo qaab u ixtiraamaaya oo difaacaaya carruurta isticmaasha adeegga.

10. Tani ma sharci baa?

Haa. Marka la eego DPA 2018 iyo GDPR, oggolaanshaha waalidka ee isticmaalka macluumaadka shakhsi looma baahna carruurta looma baahna marka laga eego adeegyada talobixinta ee sida toos ah loo siiyo ilmaha (fiiri boggeena internetka wixii faahfaahin dheeraad ah). GDPR du waxay si adag u ilaalineysaa isticmaalka macluumaadka carruurta. Waxaanu diiwaan galin karnaa, kaydin karnaa oo aanu qiimeynaa macluumaadka ku saabsan ilmahaaga haddii ay laba sababood u yimaadaan Place2Talk:

- waxaanu ilaalineynaa danaha ilmahaaga ee helitaanka taageerada latalinta iyadoo kaliya macluumaadka lagama maarmaanka ah la ururinaayo (tan waxa lagu magacaabaa "danta sharciga ah" iyadoo ah habka sharciga ee maareynta macluumaadka shakhsiga); iyo
- diiwaangelinta macluumaadku waxay macnaheedu tahay in ilmahaagu uu heli karo adeegga Daryeelka Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ah (tani waa gundhig sharciga oo dheeri ah oo loogu talagalay wax kasta oo xasaasi ah ama "waxyaalaha khaas ah") macluumaadka shakhsiga. Tani waxay la siman tahay Komishanka Macluumaadka, hay'ada UK ee ilaalisa arimaha gaarka ah.

Waxa kale oo ay la socotaa waafaqsan tahay tilmaamaha ka soo baxa BACP, halkaas oo ah Place2Be ay xubin ka tahay, iyadoo annaga SPM-yadayadu ay tahay inay waafaqaan Nidaamka Anshaxa iyo Habdhaqanka Anshaxa, si ay u hubiyaan in macluumaadka ilmahaagu uu sir yahay.

Waxaa intaa dheer waxaan sidoo kale awoodnaa inaanu isticmaalno qaar ka mid ah macluumaadka ilmahaaga ee arimaha cilmi baarista iyo ujeedooyinka tirakoobka ah, maadaama oo aanu isticmaalno macluumaadka koodhgareysan oo aanu ka saaro magaca ilmahaaga. Waxaanu sidoo kale macluumaad koodhgareysan u isticmaalnaa arimaha u sinnaanta fursaddaha iyo kormeerkooda la talintooda.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan arrintan, waxaad la xiriiri kartaa Sarkaalka Madaxa Dhaqaalaha, kaas oo lagala xiriiri karo 020 7923 5500.

11. Ma weydiisan kartaa inaan ilmahaagu aanu aadin Place2Talk?

Haa. Waxaad na weydiisan kartaa inaananu arag ilmahaaga haddii ilmahaagu uu rabo inuu aado Place2Talk. Waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso oo aad noo soo dirto warqada korka ee Place2Be Maareeyaha Barnaamijka Dugsiga.

12. Miyaad dalban kartaa macluumaadka ku saabsan ilmahaaga ee la hayo? Waxaad na weydiisan kartaa inaan kuu xaqiijino macluumaadka aan ka heyno ilmahaaga waqti kasta, oo aad naga codsan karto inaan wax ka bedelno, cusbooneysiino ama tirtirno macluumaadka noocaas ah. Tan waxaa loo yaqaan Codsiga Helitaanka Maadada (Request Access Request). Waxaa muhiim ah in la ogaado in haddii xataa ilmuhu uu aad u yar yahay si uu u fahmo saameynta xuquuqda helitaanka maadada, macluumaadka ku saabsan iyaga ayaa wali ah iyaga macluumaadkooda shakhsiga iyada oo aanu qof kale laheyn, sida waalidka ama masuulka. Marka laga hadlayo carruurta yaryar, xuquuqdan waxa laga yaabaa in ay u fuliyaan cidda leh masuuliyadooda waalidnimo. Haddii aad codsato xogta ilmahaaga, caddaynta masuuliyada waalidka ayaa la dalban doonaa. Waxaanu tixgelin doonaa haddii ilmuhu uu ku filan yahay inuu fahmo xuquuqdiisa. Haddii loo arko inay yihiin kuwo wax garanaaya waxaanu u jawaabi doonnaa ama la tashan doonnaa ilmaha ama raadsan doonaa ogolaanshaha ilmaha ee u sheegiddaada (adiga mas'uuliyadaada waalidnimo). Waxaad samayn kartaa Codsiga Helitaanka Maadada adigoo la hadlaaya Maamulaha Mashruuca Dugsiga Place2Be kaas oo ku weydiin doona inaad buuxiso foom ama inaad emayl u dirto Privacy@place2be.org.uk

13. Intee in leeg ayaanu keydineynaa macluumaadka ilmahaaga?
Waxaanu macluumaadka ilmahaaga si sugan ugu keydineynaa mudoo 6 sanno ah, kadibna waa la tirtirayaa.

14. Maxaad samayn kartaa haddii aadan ku faraxsaneyn adeegeyaga?

Haddii aadan ku faraxsaneyn dhinac kasta oo adeeggayaga ka mid ah, waxaad samayn kartaa cabasho qoraal ah oo u soo dir Sarkaalka Ilaalinta Xogta (Data Protection Officer) enquiries@Place2be.org.uk.

Haddii aadan ku faraxsanayn sida macluumaadka ilmahaaga loo xalliyay, waxaad u caban kartaa Komishanka Macluumaadka (Information Commissioner). Xafiiska komishanka macluumaadka Information Commissioner Wycliffe House Water Lane WILMSLOW SK9 5AF Telefoonka: 0303 123 1113

Waxaanu qiyaaseynaa in waalidiinta/daryeelayaashu ay warqaddan kala hadli doonaan carruurtooda, si ay iyaguna u fahmaan sida iyo sababta macluumaadka loo ururiyey. Nuqul ka mid ah warqadan ayaa sidoo kale ay heli karaan carruurta joogta xiisadaha Place2Talk.

ROYAL PATRON
HRH The Duchess Of Cambridge

www.place2be.org.uk
Registered Office: Place2Be, 175 St John St, Clerkenwell, London EC1V 4LW Tel: 020 7923 5500
Registered Charity in England and Wales (1040756) and in Scotland (SC038649)
Registered Company in England and Wales (02876150)

Registered with FUNDRAISING REGULATOR